VICTORIAN ombudsman

Sida aad macluumaadka noogu soo gudbin karto

Su'aalaha Inta badan la is weydiiyo

Waa tuma hay'ada wax baarta ee Victoria (Ombudsman-ka Victoria)?
Ombudsman-ku waa hay'ad madax-bannaan oo baarta cabashooyinka loo soo jeediyo hay'adaha dowladda ee Victoria, si loo xaqiijiyo in dadka loola dhaqmay si caddaalad ah. Annagu **kama** mid nihin Dowladda ama Homes Victoria.

Baadhitaankeenu muxuu ku saabsan yahay?
Waxaan eegaynaa waayo-aragnimada dadka ku nool guryaha dowladda ee looga raray guryahooda sababo la xiriira dowlada oo dumisay sarihii dhaadheeraa.

Waxaan eegaynaa:
- waxa dhaca marka dadku ka guuraan guryaha dadweynaha (oo ay dowladdu leedahay) una guuraan guryaha bulshada (oo ay maamulaan ururro aan faa'iido doon ahayn)?
- in guryaha ay dadku u guureen ay ku habboon yihiin iyo in kale
- waxa dhaca marka dadku ay diidaan inay guuraan?
- waxa ku dhaca dadka weli ku nool dhismayaasha dhaadheer ee ay inta badan dadkii deganaa ka guureen?
- waxa ay Homes Victoria dadka u sheegeen oo ku saabsan guuritaankooda
- dhibaatooyinka ay dadka da'da ahi kala kulmaan ka guurista guryaha.

Waxaan eegaynaa khibradaha dadka ka guuraya dhismayaasha dhaadheer ee ku yaalla Carlton, Flemington, North Melbourne, Richmond, South Yarra, Kensington, Prahran, St Kilda iyo Albert Park.

Waxaan sidoo kale eegi doonnaa sida hay'adda Homes Victoria u dayactirtay una xallisay dhibaatooyinka ka jiray dhismayaasha dhaadheer ee guryaha dadweynaha, ka dib markii dowladdu ay go'aansatay inay dumiso dhismayaashaas.

Yaan dooneynaa inaan ra'yigooda maqalno?
Waxaan rabnaa in aan ka maqalo:
- dadka ku nool dhismayaasha dhaadheer ee guryaha dadweynaha
- Dadkii hore ugu noolaan jiray dhismayaasha dhaadheer ee guryaha dadweynaha balse ka guuray
- qoysaska ama qaraabada dadka guryaha degan
- hay'adaha u dooda ama la shaqeeya dadka guryahaas degan
- hay'adihii kale ee macluumaad muhiim ah nala wadaagi kara.

Maxaan rabnaa inaan ogaanno?
Waxaan rabnaa inaan wax ka ogaanno saameynta ay ku yeelatay dadkii guryahooda ka guuray iyadoo ay sababtuna tahay dowlada oo dumineysa dhismayaasha dhaadheer ee guryaha dadweynaha ah. Waxaan rabnaa inaan ogaanno waxyaabo ay ka mid yihiin:
- sidee ayay kuu saameysay?
- si caddaalad ah ma lagula dhaqmay?
- ma ku faraxsan tahay gurigaaga cusub?
- ma waxaad ku qasbanaatay inaad lacag dheeraad ah bixiso?
- ma fahamtay waxa laguu sheegay ee ku saabsan guuritaanka?
- ma heshay macluumaad kugu filan oo ku saabsan xuquuqdaada?

Sidee ku sheegi karaa ra'yigeyga?
Noogu soo gudbi xogtaada khadka online ka, ama taleefan ama qaab iimayl ah. Foomkeena wuxuu ku qoran yahay 10 luuqadood.
Khasab maaha inaad magacaaga noo sheegto.
Luuqada aad ku hadasho ayaad noogu soo sheegi kartaa khibradihii aad la soo kulantay.

- Wac **9613 6277** (9-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha). Wac **131 450**
- si aad u hesho turjubaan lacag la'aan ah
- Fooomka aad xogta noogu soo gudbin karto: xiriiriyaha **ombudsman.vic.gov.au/our-impact/news/public-housing-submissions/**
- Ku soo dir iimaylka ah **submissions@ombudsman.vic.gov.au**

Waxaan rabnaa inaan ra'yigaaga maqalno ka hor inta aan la gaarin 1-da bisha Febraayo 2027. Waxaad sidoo kale noola hadli kartaa toos adigoo nagula kulmaya kulamada bulshada ee lagu qaban doono meel u dhow saraha dhaadheer ee guryaha dadweynaha. Waxaan dhowaan kula soo wadaagi doonnaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrimahan.

Ka warran haddii aan u baahanahay caawimaad ku saabsan sidii aan idiin la la wadaagi lahayn sheekadayda?
Fadlan noo sheeg haddii aad qabto wax iin ah, baahi dhanka luqadda ah, ama baahiyo kale, si aan kaaga caawinno inaad sheekadaada nala wadaagto.

Waa maxay sababta aan sheekadayda ula wadaagayo hay'ada wax baarta (Ombudsman-ka)?
Waxaan ognahay in dad badan oo guryaha degan ay ka daaleen inay marar badan sheegaan sheekadooda. Sheekadaadu muhiim ayay noo tahay waxaana doonaynaa inaan fahanno sida ay arrintani kuu saamaysay iyo sida lagula dhaqmay. Tani waxay naga caawin doontaa inaan ogaano dhibaatooyinka jira isla markaana aan soo jeedinno isbeddelada lagama maarmaanka ah si mustaqbalka ay arrimuhu u noqdaan kuwo ka caddaalad badan kana wanaagsan sida ay hada wax yihiin.

Maxaa dhici doona marka baaritaanku dhamaado?
Dhammaadka baaritaanka, waxaan qori doonnaa warbixin ka hadlaysa wixii aan ogaanay iyo waxa aan ku talineyno in lagu xalliyo wixii dhibaato ah ama laga saxo mustaqbalka. Warbixinta waxaan u gudbin doonnaa Baarlamaanka Victoria, waxaana ku soo bandhigi doonnaa boggayaga internetka.

Macluumaadkaygu ma ahaan doonaa mid qarsoodi ah?
Waxaan ula dhaqmi doonnaa macluumaadkaaga si waafaqsan Shuruucda barayfasiga. **Uma** sheegi doonno Homes Victoria ama cid kale in aad sheekadaada nala wadaagtay. Waxaad sidoo kale nala wadaagi kartaa macluumaadka adigoon noo sheegin magacaaga.
Mararka qaar warbixinadeena dadweynaha waxaan ku soo darnaa oraahyo laga soo xigtay wixii ay dadku soo gudbiyeen. Marka aan soo xiganayno hadalada dadka ma sheegno magacyadooda. Markaad xog noo soo gudbiso, waxaan ku weydiin doonaa inaad rabto in hadalkaaga la soo xigto.

Ma dhibaato ayaa i soo gaari doonta haddii aan idin la wadaago sheekadayda?
Homes Victoria looma oggola inay si ka duwan sida sharcigu qabo kuula dhaqanto haddii aad noo sheegto sheekadaada. Haddii aad arrintan ka walwalsan tahay, khasab kuguma aha inaad magacaaga nala wadaagto.

Ka warran haddii aan hadda caawimaad u baahanahay?
Waan ku caawin karnaa haddii aad cabasho ka qabto guryaha dadweynaha ama kuwa bulshada. Nagala soo xiriir lambarka **1800 806 314.** Si aad luuqada aad ku hadasho noogula hadasho, ka wac turjubaan nambarka **131 450.** Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa foomkayaga cabashada.

Taageerada samafalka
Inaad nala wadaagto sheekadaadu waxay noqon kartaa wax aan sahlaneyn. Noo sheeg haddii aad ka walwalsan tahay caafimaadkaaga ama caafimaadka qof kale, si aan kaaga caawino inaad hesho taageero.